

DIYAAR MA U TAHAY GURMAD?



XAALADDA DEGDEGGA AH WAXAAD U BAAHAN KARTAA INAAD KA BAXDO GURIGAAGA. WAXA MUHIIM AH IN LOO DIYAAR GAROBO.

QORSHE SAMEYSO

- Qorshe diyaarso si adiga iyo kuwa aad la nooshahayba u ogaadaan waxa la samaynayo markay xaalad degdeg ahi dhacdo
- Ku tababaro sida aad uga bixi lahayd gurigaaga si nabad ah, gaar ahaan haddii aad leedahay carruur ama xayawaan guri-joog ah. Sameyso qorshe guri ka baxsi ah oo leh laba hab oo looga baxo qol kasta oo gurigaaga ka mid ah.
- Bar tilmaameedso meel ammaan ah oo ka baxsan gurigaaga halkaas oo adiga iyo kuwa aad la nooshahayba ku kulmi doontaan haddii ay xaalad degdeg ahi dhacdo.
- meel ku xafido liiska macluumaadka xiriirka degdegga ah ee dadka aad u baahan karto inaad wargeliso ama la xiriirto, oo ay ku jiraan kuwa ku nool aagag kaa fog.

DIYAARSO GO-BAG

Diyaar ha kuu ahaato Go-Bag waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad uga baxdo gurigaaga si lama filaan ah. Boorsadaada Go-Bag-ga ah waa inay fududahay oo sahal loo qaadi karo, sida boorsada dhabarka ama kuwo la jiito. Ku hayso armaajadaada hore ama meel ku dhow albaabka laga baxo sahal u helid awgeed.

BOORSADAADA GO-BAG-GA AH WAA INAY KU JIRAAN:

- | | |
|--|---|
| <input type="checkbox"/> Biyo (cabid ama nadaafad) | <input type="checkbox"/> Lacag (sarrif iyo sunuud) |
| <input type="checkbox"/> Cunto aan hallaabin | <input type="checkbox"/> Furyaal dheeri ah kuwa guriga iyo baabuurta |
| <input type="checkbox"/> Raadiyo batteri ku shaqeeya ama mid batterigiisa gacan wareejin lagu cabbeeyo | <input type="checkbox"/> Wax gacmaha bakteeriyada ka dila |
| <input type="checkbox"/> Bateriyaal | <input type="checkbox"/> Turub ama cayaaro kale |
| <input type="checkbox"/> Dhar (oo ku habboon xilliga) | <input type="checkbox"/> Wax kuu cabbeyn kara telefoonnada |
| <input type="checkbox"/> Daawooyinka takhtarku kuu qoray | <input type="checkbox"/> Nuqullada dukumiintiyada muhiimka ah (Sida, baasaboor, waraaqaha caymiska) |

! U habeyso boorsadaada Go-bag-ga ah si ay u daboosho baahiddaada gaarka ah. Haddii aad heysato xayawaan guri-joog ah, xusuusnow inaad xirxirato agabka xayawaanka sidoo kale.